# MASHRUUCA DIB UGU SHUBISTA LAAMIGA EE 2025

## Su'aalaha soo noqnoqda

### Isticmaalka Lugeeyaha

**Q: Sideen u gali karaa wadadayda inta hawsha dhigista Daamurku ay socoto?**

J: Haddii wadadaada lagu calaamadiyo casaan khariidada ku lifaaqan, wadadaadu waxay u badan tahay inay xidhnaan doonto saacadaha hore ee subaxda ilaa galabnimada dambe ee maalinta dhigista Daamurka oo waa inay ahaataa mid xidhan afar ilaa lix saacadood ka dib marka la dhammeeyo, wakhtigaas oo aan la ogolayn in la dhigto Baabuurta iyo in baabuur lagu kaxeeyo. Iyadoo dadka deegaanka, meheradaha iyo booqdayaasha sidoo kale lagu dhiirigelinayo inay ka fogaadaan inay ku lugeeyan aagga la marinaayo Daamurka ila si fiican wadada dib loogu furo, dhinacyada lugayntu waxay u furnaan doonaan isticmaalka lagama maarmaanka ah inta lagu jiro wakhtigaas.

**Q: Wadadaydu ma laha dhinaca lugta. Sideen ug lugayn kara aaga inta suhaqada Daamur marinta la qabanayo? Ma ku socon karaa cidhifyada wadada?**

A: Inkasto dadka deeganka, meheradaha iyo dadka soo booqda sidoo kale guud ahaan lagu dhiirigelinayo inay ka fogaadaan inay ku wareegaan aagga la marinaayo Daamurka ilaa dariiqa dib loo furayo, shaqaalaha mashruuca waxay nadiifin doonaan Cirifyada haddii dhinaca lugta aysan lahayn waddooyinka ay saamaysay. Xusuusin ahaan, dadka lugeynaya iyo xayawaanka rabaayada ah waa inay sidoo kale ka taxaddaraan inay ka fogaadaan alaabta Daamurka ilaa waddada dib loogu furo Baabuurta sababtoo ah emulsion-ka aan la daaweynin way adagtahay in laga saaro dharka, kabaha ama calaacalaha.

### Isticmaalka Baabuurka

**Q: Ma saxan tahay in aan baabuurkeyga dhigto meel u dhow wadada, marba haddii uusan taabanayn laamiga?**

A: Baarkinka wadada iyo baabuurta looma ogolaan doono baloogyada la doortay (ee casaanka lagu calaamadeeyay ee khariidadda ku lifaaqan) maalinta la marinaayo Daamurka, gaadiidkuna waa in ay gabi ahaanba ka fogaadaan wadada/Daamurka inta lagu jiro wakhtigan. Haddi gaadhigaagu uu ku baakin garaysan yahay wadada agteeda balse aanu saaranayn ama aanu ku jirin wadada/laamiga, tani waa inay noqotaa mid la aqbali karo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad noo soo dirto sawir si aad u xaqiijiso waxaad ku so diri kartaa DOT_SlurrySeal@Seattle.gov.

**Q: Baabuurkaygu hadda waa jaban yahay oo ma awoodo inaan dhaqaajiyo. Maxaan sameeyaa?**

A: Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo dhaqaajinta gaadhiga jaban ka hor nidaamka Daamur marinta, fadlan nagala soo xidhiidh DOT_SlurrySeal@Seattle.gov sida ugu dhakhsaha badan waxaanan isku dayi doonaa inaanu kula diyaarino. Baabuurta ku sii hadha dariiqa iyada oo aan hore loo sii sheegin waa la jiidayaa.

### Jadwalka Daamur marinta

**S: Ilaa intee in le'eg ayaa la igu soo wargelin doonaa shaqada?**

J: Kooxdayadu waxay kuu soo diri doontaa ugu yaraan saddex ogeysiis ka hor inta aan la bilaabin shaqada Daamur dhigista. Qof kasta oo ku nool ama ka shaqeeya meherad ku taal baloogyada Daamurka la dhigayo waxa uu helay warqad bilow ah oo ku saabsan shaqada. Ogeysiiskani waa boostadaada labaad iyo ugu dambeyntii, kooxdayadu waxay aadi doonaan albaab-ilaa-albaab 72-saacadood ka hor Daamur dhigista qandaraaslayaashu waxay sidoo kale dhigi doonaan wadada calaamadda "No Parking" saddex maalmood ka hor.

**Q: Waxaan haystaa qandaraasleyaal la qorsheeyay inay yimaadaan Gurigayga isla usbuuca Daamur dhigista. Maxaan sameeyaa?**

A: Haddii aad leedahay qandaraasleyaal gaar ah oo loo qorsheeyay inay ka shaqeeyaan gurigaaga ama meheraddaada waqti isku mid ah kan Daamur dhigista, fadlan dib u dhig ama hubi inay awoodaan inay galaan gurigaaga iyaga oo aan wadin Gaari ama dhiganayn waddada inta lagu jiro dayactirka, iyo lix saacadood ka dib marka la dhammeeyo. Haddii aad haysatid shaqo dhisme oo gaar ah oo ku lug leh goynta tamarta ee laamiga wadada, fadlan sidoo kale ha dhamaystiro goynta oo si joogto ah dib ha loogu soo celiyo ka hor shaqada Daamur marinta.

Seattle Department of Transportation

**Q: Waxa aan leeyahay ballan/alaab keenis oo muhiim ah isla maalinta shaqada Daamur dhigista. Maxaan sameeyaa?**

A: Haddii aad leedahay jadwal alaab keenis isla wakhtiga jidka Daamurka la marinaayo, fadlan jadwaka dib u dhig ama hubi in qofka wax kuu keenaya uu awoodo inuu alaabtaada keeno iyada oo la adeegsanayo marinka lugaynta. Haddii aad leedahay jadwal balan isla wakhtiga nidaamka Daamur dhigista, fadlan dib u samee jadwalka ama hubi inaad awood u leedahay inaad jidkaaga ka marto adigoo adeegsanaya marinka lugeeyaha oo keliya.

## Geedi socodka Daamur dhigista & waqtiga

**Q: Wadooyinkee ayaa heli doona dayactirka laamiga?**

A: Kaliya waddooyinka lagu calaamadeeyay guduudka ee khariidadda ku lifaaqan ayaa heli doona dayactirka laamiga. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu ogeysiinaynaa dhammaan deganayaasha ku nool aagga lagu calaamadeeyay midabka jaalaha ah maadaama laga yaabo inay saameyn ku yeelato qaabkooda caadiga ah ee taraafikada.

**Q: Sideen ku ogaan karaa marka shaqaaluhu ay shaqada ka bilaabayaan wadadayda?**

A: Ilaa saddex maalmood ka hor shaqo kasta, waxaad arki doontaa calaamadaha "No Parking" oo yaala waddada ay saamaysay. Subaxda shaqada Daamur dhigista, waxay u badan tahay inaad arki doonto shaqaalaha oo bilaabaya inay yimaadaan ku dhawaad 6:30 subaxnimo si ay u diyaariyaan hawsha, iyagoo ka hortagaya xaalad kasta oo aan la filayn.

**Q: Intee in le'eg ayay qaadanaysaa Daamur dhigistu bilaw ilaa dhammaad?**

A: Habka Daamur dhigistu wuxuu caadi ahaan qaataa ku dhawaad hal saac bilawga ilaa dhamaadka. Waddadu waxay markaa u baahan doonta in la xidho ilaa lix saacadood ka dib marka la dhammeeyo si loo helo natiijada ugu fiican.

## Adeegyada Dadweynaha

**Q: Shaqada Daamur ku shubistu waxay dhacaysaa isla maalinta la ururinayo qashinka/dib u warshadaynta goobtayda. Maxaan sameeyaa?**

J: Haddii jidkaaga loo qorsheeyay in lagu shubo Daamur isla maalinta alaabta dib-u-warshadaynta laga soo qaadayo waxaa lagugu wargelin doonaa inaad hubiso in haamahaaga la dhigay habeenka ka horreeya subaxdas laga qaado ka hor intaysan bilaabin shaqada Daamur dhigistu. Su'aalaha ku saabsan qashinka iyo qaadista alaabta dib-u-warshadaynta, ama haddii aan qashinkaaga la qaadin oo ay ahayd in la qaado, waxaa lagu hagaajin karaa: DOT_SlurrySeal@seattle.gov.

**Q: Baska dugsiga ee ilmahaygu wuxuu soo istaagaa laamiga waddada la dayac tirayo. Sideed wax uga qaban doontaan arrintan?**

A: Caadi ahaan, adeegga baska dugsigu waxa uu dhamaadaa 8:45 subaxnimo waxana uu dib u bilaabmaa 2:45 galabnimo. Kooxdayadu waxay hagaajin doonaan jadwalka shaqada ee wadadaas inta u dhaxaysa 9:00 subaxnimo ilaa 2:30 galabnimo.

## Waddooyinka la doortay ee loogu talagalay dayactirka Daamurka

**Q: Sidee waddooyinka loogu doortay dayactirka laamiga?**

A: Magaalada Seattle waxay ku so darsatay qaybo badan oo ka mid ah Degmada King 1950-meeyadii iyo 1960-meeyadii, kuwaas oo badankoodu lahaa wasaq ama sagxad quruurux ah. Waddooyinkan waxaa lagu shubay qadar yar oo daamur ah tan iyo wakhtigaas SDOT waxay si joogto ah u dayactiri jirtay jidadkas si ay u kordhiso nolosha laamiga. Waddo kasta oo loo doortay sanadkan dayactirka laamiga waxay ku salaysan tahay da'da laamiga hadda jira iyo sidoo kale kormeer ay goobta ku sameeyeen shaqaalaha SDOT.

**Q: Waxaan ku noolahay meel u dhow, laakiin jidkaygu kuma jiro liiska waddooyinka laamiga la dayactirayo. Yaan la xidhiidhaa haddii aan rabo in waddadayda ay hesho Daamur dhigis mustaqbalka?**

A: Haddii aad u malaynayso in wadadaadu ay hesho tixgelin dheeraad ah mustaqbalka oo dayactir ah, fadlan kala xidhiidh Waaxda Isgaarsiinta ee Seattle email ahaan fadlan xor u noqo inaad nalaga soo xiriirto DOT_SlurrySeal@seattle.gov ama wac 206-775-8742.

**Q: Jadwalka dayactirka laamigu ma isbedeli karaa? Goorma ayaa nala soo ogeysiin doonaa, haddii isbadal dhaco?**

A: Dayactirka Laamiga ee la qorsheeyay waa la bedeli karaa habka ugu fiican ee looga war heli karo isbeddelada jadwalka waa in la saxiixo adeegga iimaylka ee Mashruuca. Sawir code-ka QR ee hoose si aad u booqato Websitekayaga oo aad iskugu darto liiska iimaylka mashruuca.